



REPUBLIC OF

SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2296/032014

20/03/14

XEER MADAXWEYNE Lr: 0378/032014

**Aasaasidda Guddida Hoggaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka iyo Guddi
Hawleedkeeda**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 94aad Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 3aad ee Xeerka jinsiyadda, Xeer Lr. 22/2002 oo
waajibinaya in muwaadiniintu helaan aqoonsiga
muwaadinimo;
- Markuu La Tixgeliyey: Siyaasadda Golaha Wasiirradu ansixiyeen ee ay ku
go'aamiyeen in la sameeyo Diiwaangelinta muwaadinka;
- Markuu Arkay: Baahida loo qabo in la helo Diiwaangelinta muwaadinka
oo laga sameeyo Dalka oo dhan si loo helo xog sugan;
- Markuu Yaqiinsaday: In Diiwaangelinta Muwaadinka ay udub-dhexaad u tahay
isla markaana fudaysinayso in la helo diiwaangelinta
codbixiyaha oo gogol xaadhaysa in la helo doorasho xor
oo xalaal ah;
- Markuu Xaqiiqsaday: In ay tahay daruuri in la sugo muwaadiniinta reer
Somaliland si loo xaqiijiyo in ay codeeyaan
muwaadiniinta oo keliya;
- Markuu Garwaaqsaday: In la dardar-geliyo loona qabto hawsha diiwaangelinta
Muwaadinka si dhaqso ah;
- Isagoo Maanta ku Haya: Ahmiyadda doorashooyinku ku leeyihiin Qaranka iyo
sidii ay u dhici lahayd doorasho xor oo xalaal ah;

Wuxuu halkan ku soo saaray Xeerkan;

Qodobka 1aad: Aasaaska Guddida Hoggaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka

Waxaa xeerkan lagu aasaasay Guddiyada soo socda:

Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka (Steering Committee) oo ka kooban:

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiye.
2. Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada, Xubin.
3. Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, Xubin.
4. Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, Xubin.
5. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Xubin.
6. Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta, Xubin.
7. Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Qaranka, Xubin.

Qodobka 2aad: Ujeeddada Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka

Ujeeddada Guddida Hogaamintu waa hogaaminta iyo ka midho dhalinta habka diiwaangelinta muwaadinka.

Qodobka 3aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka

Xilka iyo Waajibaadka Guddida Hogaamintu waa:

1. Dejinta iyo xaqiijinta qorshayaasha Diiwaangelinta Muwaadinka
2. Ansixinta qorshaha diiwaangelinta.
3. Hagidda iyo daba-galka guddi hawleedka lagu aasaasay Qodobka 1aad ee xeerkan.
4. Ka-talo bixinta caqabadaha laga yaabo in ay soo food-saarto hawsha diiwaangelinta.
5. Ka-talo bixinta soo saarista Xeerarka, Wareegtooyinka iyo amarrada lagama maarmaanka u ah meel marinta diiwaangelinta.

Qodobka 4aad: Aasaaska Guddi Hawleedka Diiwaangelinta Muwaadinka

Guddi Hawleedka Diiwaangelinta Muwaadinka (Task Force) oo ka kooban:

1. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiye.
2. Mareeyaha ICT Commission, Xubin.
3. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Madaxtooyada, Xubin.
4. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Maamul Wanaaga, Xubin.
5. Garyaqaanka Guud ee Qaranka, Xubin.
6. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta, Xubin
7. Dr. Maxamed Cabdi Daa'uud, Xubin.

Qodobka 5aad: Ujeeddada Guddi Hawleedka

Ujeeddada Guddi Hawleedku waa meel marinta siyaasada iyo ka midho dhalinta qorshayaasha Guddida Hogaaminta.

Qodobka 6aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddi Hawleedka

Xilka iyo waajibaadka Guddi Hawleedku waa:

1. Fulinta siyaasadda iyo qorshayaasha Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka.
2. Fulinta hawl-maalmeedka Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka.
3. La socodsiinta iyo uga warbixinta Guddida Hoggaaminta Diiwaangelinta habka ay u socoto Diiwaangelintu.
4. La socodsiinta iyo uga warbixinta Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka caqabadaha farsamo ee soo foodsaari kara hawsha diiwaangelinta iyo soo jeedinta talooyinkooda la xidhiidha caqabadahaa.

Qodobka 7aad: Xarunta Guddiyada

Labada Guddi waxay ku hawlgalayaan Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo udub-dhexaad u ah hawsha diiwaangelinta.

Qodobka 8aad: Dhawrida Xilliga iyo Nidaamka

Guddiyada waxaa la farayaa in hawsha lagu qabto wakhtiga loo qorsheeyey lana raaco Nidaamka Guddida Qandaraasyada Qaranka iyadoo la dhawrayo hanaanka iyo habsami u socodka shaqada.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland